



# Fariinta ka socota Portland Interscholastic League (Horyaaalka Dugsiyada Portland): Xilliga 2aad Hagaha Taageerayaasha ee Ciyaaraha PIL 2020-21

Febraayo 26, 2021

Qoysaska PPS ee Qaaliga ah,

Waxaan ku faraxsanahay inaan siino ardayda-ciyaartooyda ee Portland Public Schools fursad ay kaga qaybgalaan tartamada isboortiga Horyaaalka Dugsiyada Portland oo marki ugu horaysay muddo sannad ka badan la bilaabayo usbuuca soo socda.

Iyado loo diyaargaroobaya xilliga, maamuleyaasheenna, agaasimayaasha isboortiga, tababarayaasha iyo shaqaalaha kale ee taageerada ayaa waqtii badan ku qaataay dib u eegista hagitaanka ay bixiyeen gudoomiyaha, Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) iyo Ururka Waxqabadyada Dugsiyada Oregon (OSAA), iyo qorsheynta si nabadgeleyo leh u qabashada dhacdooyinkayaga ciyaaraha fudud. Iyadoo lagu saleynayo **xaddidaadaha** la saaray waxqabadyada Dugsiyada u dhaxeeya masiibada awgeed, PPS waxay go'aamisay in **kaliya tababarayaasha sharciyasan, cayaartoyda iyo shaqaalaha munaasabadda ee la ansixiyay loo oggolaan doono inay ka soo qayb galaan tartamada si shaqsi ah**. Nasiib darrose uma oggolaan karno inay daawadayaashu ka qayb galaan tartannada xilligan.

OHA waxay muujisay in dadku ay ku sii nagaan karaan gawaaridooda goobta gawaarida la dhigto si ay u daawadaan tartan. Kuwa doorta inay sidaa yeelaan, waxaan ka codsaneynaa inay ku sii jiraan gawaaridooda marwalba oo aysan ku kulmin banaanka gawaaridooda ama hareeraha xayndaabka goobta.

Waan ognahay inaysan isku mid noqon doonin saaxiibo iyo reer la'aan tarabuunka gu'gan. Weli, waxaan fahamsanahay sida ay muhiimka u tahay in fursaddan loo siiyo ardaydeena ciyaartooyda ah, iyadoon loo eegin taxaddarrada ay tahay inaan qaadno si ay u dhacdo. Qaar badan ayaa ka baqay inaan awoodi kari weyno inaan halkaan soo gaarno. Waan ka mahadcelineynaa taageerada ay qaadatay in halkaan la yimaado waxaana u mahadcelineynaa cayaartoyda, waalidiinta, iyo tababarayaashii suurta galiiyay.

Horyaaalka Dugsiyada Portland